



Telecommunications Industry Ombudsman

Xaashida Macluumaadka TIO

Muxuu yahay Ombudsman-ka Isgaarsiintu (TIO)?

TIO waa adeeg lacag la'aan ah oo loo sameeyay inuu caawiyo dadka xal ka gaari waayay dhibaato ka haysata shirkadaha telefoonada iyo internetka.

Si kasta ha ahaatee, waa inaad marka ugu horaysa isku daydid inaad xal kala gaadhid cabashadaada shirkada ku siisa adeega isgaarsiinta intaadan na soo wicin.

Waxaanu baari karno

TIO waxay baadhi kartaa dacwadaha la xiriira telefoonka gacanta, Telefoonka guriga iyo arimaha Internetka ee ku saabsan:

- biilka (oo ay ka mid yihiin heshiisyo khalad ah, sicir khalad ah, biil xili dambe la soo diray)
- dhibaatooyin la xiriira adeegyada qoraalada lagu gudbiyo telefoonada (kuwaas ooy kuu suurtagali weydo inaad iska joojiso)
- cilado iyo tayada adeega
- dib u dhac ku dhaca xiriirinta
- hawlaha deyn soo xaraynta (ay ka mid yihiin dhibaatooyin la xiriira lacag bixinta sidii loo qorsheeyay iyo deyn bixin waayid)
- heshiisyada (ay ku jiraan shuruudo aan cadayn ama xaq ahayn).

Waxaan baarid ku samayn karin

Ma baari karno dacwadaha ku saabsan:

- arrimo aad la socotay in ka badan laba sanadood inta aadan nala soo xiriirin (mararka qaarkood waxaan tan u durkin karnaa lix sanadood).
- siyaasada dawlada ee ku saabsan isgaarsiinta
- qalabka isgaarsiinta ee sida goonida ah loo leeyahay (waxaa kamid ah telefoonada gacanta ama kombuyuutarada lacagtooda la wada bixiyay)
- waxyaalaha ku jira adeega sida codadka telefoonka gacanta ee la isku soo diro iyo website-yo
- sicirka shirkadaha ee la xiriira adeegyada ay bixiyaan iyo qalabka
- Waxyaalo maxkamad la geeyay (ama sugaya in maxkamad la hor geeyo).

Adeega turjubaanka

Hadaad u baahan tahay turjubaan wac 131 450. Waa adeeg lacag la'aan ah. Waa inaad cid u wakiilato inay dacwadaada kuugu gudbiso TIO hadaadan af ingiriiskaaga ku kalsoonayn ood wax kula xiriiri karin.

Kala xiriir TIO

Telefoon lacag la'aan ah: 1800 062 058*

TTY: 1800 675 692

Qoraal u dir:

Fakis lacag la'aan ah: 1800 630 614

Email: tio@tio.com.au

Mail: PO Box 276

Collins Street West Vic 8007

* Hadaad telefoonka gacanta ka wacdid lacag ayaa kugu socon karta, lacagtaas kugu socotana waxay ku xiran tahay hadba shirkada bixisa adeega telefoonkaaga. Hadaad naga soo wacaysid telefoonka gacanta noo sheeg anagaa ku soo wacaynee.